



Xusuusin: Fursadaha Tallaalka COVID-19 ee Ardayda Da'doodu Tahay 12 iyo Wixii Ka Weyn

Maayo 24, 2021

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Sidii [aan hore idiinla wadaagnay](#), Hay'ada Caafimaadka Oregon waxay ku dhawaaqday dhawaan ansixinta in dadka da'doodu tahay 12 sanno iyo wixii ka weyni ay qaadan karaan tallaalka COVID-19 ee Pfizer kaasi oo loogu talagalay in la qaato labo jeer. Waxaan sii wadaynaa inaan ardayda iyo qoysaskooda siino taageeradii tallaalka ee laga qaadanayey Oregon Convention Center (OCC) ama Xarunta Shirweynayaasha Oregon.

Fadlan waxaad booqataan [Shabakada Tallaalka Qoyska iyo Ardayda ee PPS](#) si aad u heshaan xogta ku saabsan fursadaha aan taageerno ee tallaalka maalinta Arbacada iyo sida aad u codsan kartaan gaadiidkii loo raacayey isla markaana idinka soo celinayey goobta tallaalka laga qaadanayo ee Oregon Convention Center. **Todobaadkani waa todobaadkii ugu dambeeyey ee laga bixinayey Xarunta Shirweynayaasha Oregon (OCC) tallaalka koowaad. Tallaalka kiisa labaad waxaa laga bixinayaa ilaa iyo inta albaabada loo xidhayo Juune 19keeda.**

Ardayda da'doodu tahay 15 sanno iyo wixii ka weyn waa ay isdiiwaangalin karaan ama waxa iman karaan Xarunta Shirweynayaasha Oregon (OCC) sidii ay u qaadan lahaayeen tallaalka. Ardayda da'doodu tahay inta u dhaxaysa 12 sanno ilaa 14 sanno waa inay la socdaan waalidkooda, daryeelahooda ama qof waalidku soo wakiishay. Haddii qof weyn oo aan ahayn waalidkiis la socdo, ardaygu waa inuu wataa foomka oggolaanshaha tallaalka kaasi oo uu soo saxeexay waalidkiis. Hoose waxaa ku yaala foomka oggolaanshaha oo lagu turjumay dhammaan luqadaha PPS taageerto:

- [Ingiriisi](#)
- [Isbaanish](#)
- [Fiitnaamiis](#)
- [Shiineys](#)
- [Soomaali](#)
- [Ruush](#)

Waxay xusuusin kalena tahay, tallaalkada laga qaadanayo Xarunta Shirweynayaasha Oregon (OCC) iyo goobaha kale ee aad si fudud uga qaadan kartaa tallaalka todobaadkani oo dhan. Waxaad booqan kartaa <https://getvaccinated.oregon.gov/#/locator> si aad uga raadisaan fursadaha tallaalka ee dariskiina ama waxaad ka hubisaa Degmada Multnomaha [liistada goobaha tallaalka](#).

Waad mahadsana tihiin.